AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Gaadiidka

## Gaadiidka Dadweynaha

Gaadiidka dadweynaha waa sida dhaqaale ahaan ugu jaban oo loogu dhex socon karo magaalooyinka. Gaadiidka dadwynaha waa u-kala duwan yahay bulshooyinka Australia. Magaalooyinka waaweyn waxay leeyihiin:

- Taraamyo
- Basas
- Huuriyo
- Tareenada

Waa inaad haysataa **tikidh** markaad raacayso gaadiidka dadweynaha. Mararka qaarkood waxaad tikidho u gadan kartaa socdaalkaaga waxaa kaloo jirta in magaalooyinka qaarkood leeyihiin **kaararka socdaalka**. Kaararka socdaalka waxay kuu ogolaanayaan inaad kareedhit ku shubato kaarka socdaalka markaasna waxaa dulmarinaysaa kaarkaaga markaad soo fuusho iyo markaad ka degayso gaadiidka dadweynaha.

### Noocyada Tikidhada

**Keli ah:** Waa tikidh hal mar ah waxaa ka mid ah isku-baddelka ku jira xadadka waqtiga oo gaar ah.

**Soo-noqod ah:** Waa tikidh soo-noqosho leh wuxuuna kuu ogolaanayaa inaad u socdaasho meeshaad doonayso aadna guriga ku soo noqoto mar dambe.

**Maalinle ah:** Waa socdaal aan xadidnayn oo lagu tago soonayaasha la-gatay ilaa adeegga ugu dambeeya ee loo qorsheeyey maalintaas ayada ah.

**Maalinlaha waqtiga aan mashquulku-jirin:** Badiba dowlad-goboleedyada iy taritooriyada waxay bixiyaan socdaalka aan xadidnayn oo la dhimay inta u-dhaxaysa 9 am iyo 3:00 casarkii iyo wixii ka dambeeya 7fiidkii Isniinta ilaa Jumcaha, iyo maalinta oo dhan maalmaha weekends-ka ah iyo fasaxyada dadweynaha oo ku e’g soonayaasha la gatay.

**Asbuuclaha ah:** Waa socdaal aan xadidnayn oo ku e’g soonayaasha la gatay ilaa hal asbuuc (toddobo maalmood oo isku xiga) laga bilaabo taariikhda gadashada.

**Baasyada bisha oo ah saddex, lix, iyo 12 ah:** Baasaska muddada dheer ah ayaa loo heli karaa adeegyada gaadiidka gaar ah. Qiimaha badanaa la dhimaa wuxuun kugu caawinayaa inaad dhaqaalaysato lacagta gaadiidka.

## Gaadiidka gaarka ah

### Lahaanshaha iyo wadidda baabuurka

Meelaha aan gaadiidka dadweynaha aan laga helin ama uusan fududayn, waxaad yeeli kartaa inaad gadato baabuurkaaga sida ugu dhaqsaha badan. Lahaanshaha baabuurku waa fudud yahay has ahaatee waa qaali. Waxaa jira masuuliyado badan oo ku jira lahaanshaha iyo wadidda baabuurka ee Australia gudaheeda.

Si baabuur loogu wado Australia, waa inaad haysataa laysanka darawalnimada Australia, baabuurkuna waa inuu ahaadaa mid ka diiwaangashan dowladaha dowlad-goboleedyada iyo teritooriyada waana in la caymiyaa.



## Helidda laysanka darwalnimada

Haddii aad leedahay laysanka darawalnimada oo aad ka wadato waddankaagii hooyo **waxaad weli u baahan tahay inaad codsato laysanka Australia.** Si taas loo sameeyo, waxaad u baahan doontaa inaad samayso imtixaanka xeerarka waddada aadna samayso imtixaanka baabuur-wadidda. Waxaad kaloo u baahan tahay tababarka baabuur-wadida oo dheeraad ah. Waa inaad wacdaa haya'dda waddooyinka dowlad-goboleedkaaaga ama teritoorigaaga wixii macluumaad dheeraad ah. Weydii qofka caseworkerkaaga ama proposer – kaaga ah si ay kuu caawiyaan.

Waxaad kaloo u baahan tahay inaad laysanka darwalnimaadaada ee aad ka heshay waddankaagii hooyo oo Ingiriisiga lagu turjumey. Sidaas waxaad ku samayn kartaa arintan ayadoo lacag la'aan ah adoo ku soo gudbinaya [www.translating.dss.gov.au](http://www.translating.dss.gov.au)

## Sidee baan ku heli karaa laysanka darawalnimada Australia?

Laysanka darawalnimada Australia waxaa laga maamulaa heer dowlad-goboleedka iyo taritooriyadda ayadoo qawaaniintuna u kala duwan yihiin dowlad-goboleed kasta.

La-xiriir qofka caseworker-kaaga iyo proposer-kaaga markii lagu dejiyo aadna diyaar u-noqoto inaad bilowdo sida baabuurka loo wado. Sida caadiga ah, waxaad ka bilaabi doontaa darawalnimada learner licence, waxaad u-wareegi doontaa provisional licence ugu dambayntii waxaad heli doontaa laysanka darawalnimada Australia. Xeerar kala duwan iyo xanibaadyo ayaa khuseeya qayb kasta ee laysanka (tusaale ahaan, heerarka khamriga).

## Diiwaangelinta baabuurta

Waa inaad diiwaangelisaa baabuurka si aad ugu wadato waddooyinka, waa inaad cusboonaysiisaa diiwaangelintaada sannad kasta. Waa sharci-darro in la wado baabuur aan diiwaangashayn ayadoo weliba badiba baabuurta booliiska ay leeyihiin iskaanada lambarka balaydhka si loo hubiyo diiwaangelinta baabuurta.

## Caymiska baabuurta

Caymiska Qaybta Saddex oo Qasabka ah (Compulsory Third Party - CTP) waa caymiska dhaawaca shaqsiyeed kaas oo qasab ku ah baabuur kasta oo ka diiwaangashan Australia. Noocyada kale ee caymiska waxay caawiyaan inay bixiyaan waxyeellada ay sababeen shilalku.

## Waxyaalaha muhiimka ah in la xusuusto oo ku saabsan baabuur-wadidda

- Mar kasta xiro suunka kursiga (taas waxay khuseysaa darawallada **iyo** rakaabka). Taas waxaa u baahan sharciga waxaana jira ciqaabo haddii aadan samayn ciqaabo
- Carruurtu waa inay fariistaan kursiga gadaale, xirtaan suunka kursiga kuna fariistaan kursiga baabuurka ee ilmaha oo ku habboon da'dooda
- Marna haku wadin baabuur aan diiwaangashanayn waddada
- **Marna ha wadin baabuur adoon wadan laysan sax ah**
- Mar kasta wado laysankaaga darawalnimada
- Haddii uu joojiyo sarkaalka booliisku, mar kasta si daacad ah uga jawaab su'aalahooda
- Fuli dhammaan xeerarka waddada iyo calaamadaha waddada. Taxadar gaar ah u-yeelo baabuur ku-wadidda is-goysyada-wareegga ah
- Marna ha wadin baabuur haddii aad cabtey khamri ama aad qaadatay daroogo. Taasi waa dambi waxaana khuseeya ciqaabo daran
- Waa sharci-darro in la adeegsado taleefanka moobaylka oo gacanta lagu qaato marka baabuurka la wado. Taasna waxaa ka mid ah samaynta ama qabashada wicidda taleefanka, diridda tekiska, cayaaridda dheelaha, sawir/fiidiyow qaadidda ama raadinta webka iwm. Ciqaabo ayaa jiraya haddii aad jebiso sharciga.



*Qaybta dib loo eegay (April 2018)*

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM